



# Fact Sheet

[www.abs.gov.au/census](http://www.abs.gov.au/census)

## **Tirakoobka 2006, ee Talaadada 8 Ogosto, waa u muhiim bulshadaada**

Qof walba oo Austareeliya jooga waxaa lagu tirinayaa Tirakoobka Guriyeynta iyo Tirada Dadka ee Qaranka. Caawimaadaadu aad bay muhiim ugu tahay mustaqbalka bulshadaada.

Ururada Bulshooyinka, dawlada iyo ganacsiguba dhammaan waxay isku haleeyaan macluumaadka tirakoobka si ay u qorsheeyaan tasiilaadka bulshada iyo adeegyada sida guriyeynta, caafimaadka, waxbarashada, adeegyada afafka, iyo barnaamijyada caawimaada khaaska ah leh.

## **Su'aalaha ku saabsan meeshaad ku dhalatay, afafka aad ku hadasho, diinta iyo asalkaaga**

Tirakoobka 2006 -du waa sawirka qof kasta oo Australia jooga wuxuuna cabirayaa waxyaalaha sida da'da, goobta dhalashada, afafka lagu hadlo, diinta iyo qofka asalkiisa iyo sidoo kale ogaanshaha in dadku u baahan yihiin caawimaada afka Ingiriiska. inaad u baahan tahay.

Ururada Bulshada Jinsiyeed way ictiraafsan yihiin Tirakoobka. Macluumaadka lagu bixinayo foomka Tirakoobku wuxuu ka caawinayaa inuu ka bixiyo sawir sax ah bulshooyinkooda. Macluumaadka Tirakoobku wuxuu sidoo kale caawinayaa u qoondeynta si cadaalad leh maaligeinta dawlada ee bulshooyinka jinsiyada.

## **Qor jawaabtaada haddii aysan liiska ku jirin**

Macluumaadka diwaanka tirakoobka qiyaastii waa 280 dal, 240 af iyo 120 diimood. Foomka tirakoobku ma wada qaadi karo mana wada koobi karo dalalkoo dhan, afafka, iyo diimaha. Fadlan ku qor jawaabtaada meesha lagu siiyey haddii dalkaaga, afkaaga, ama diintaadu ayna ku qorneyn.

## **Macluumaadkeygu ma mid gaar ahbaa?**

### **Dhammaan macluumaadka lagu soo ururiyo Tirakoobkan waa qarsoodi – sharci ahaan.**

Arimahaaga gaarka waxaa lagu damaanad qaaday in la ilaalinayo.

Wax magac ah ama macluumaad cinwaan ah oo lahaynayaa ma jiro ilaa aad adigu dooratay mooyee inaad ka mid noqoto Capsule ka Wakhtiga Tirakoobka. Dhammaan foomamka waraaqaha ah ee tira koobka iyo wixii faylal kumbuyuutar ahba waa la baabiinayaa marka laga shaqeeyo ka dib.

Dhammaan shaqaalaha, sharci ahaan wuu qabanayaa inayan weligood sheegin macluumaad shakhsiyeed. Ururada sida Xafiiska Cashuuraha, Centrelink, Waaxda Socdaalka, shirkadaha sida tooska ah suuqgeynta u sameeya weligood kama heli karaan macluumaad shakhsiyeed tirakoobkaa.

## Capsule ka Wakhtiga Tirakoobka

Waad dooran kartaa in macluumaadkaaga Tirakoobka uu lahaado magacaaga iyo cinwaanka, inay u hayso si ammaan leh Aarkiifiyada Qaranka ee Australia 99 sanno. Maadaama aysan cidna aysan arki doonin macluumaadka Tirakoobka 99 sanno, mashruucan waxaa layiraahdaa Capsule ka Wakhtiga Tirakoobka.

Sannadka 2105, Aarkiifiyada Qaranku waxay bixineysaa macluumaadka ku jira Capsule ka Wakhtiga dadweynaha iyo jiillalka mustaqbalka waxay awoodi doonaan inay raadiyaan abtirkooda.

### **Ka qaybqaadashada Capsule ka Wakhtiga Tirakoobka dhammaantii waa ikhtiyaari.**

Cid allaale cidii aan bixin ka raali ahaanshahooda mashruucan macluumaadkooda Tirakoobka waa la baabiinayaa, iyadoo la raacayo sida ay u sameyso Ha'yada Tirakoobka Australia , isla marka la dhamaystiro tirakoobida shaqadeeda.

## Sidee baa loo sameeyaa tirakoobka

Cid kasta oo Australia joogta waa la tirinayaa, meel alaale meeshii ay joogaan habeenka tirakoobka (Talaadada 8 Ogosto), oo ay ku jiraan dalxiisayaashu. Ururiyaha Tirakoobka ayaa keenaya foomka tirakoobka iyo hage ku caawinaya gurigaaga labada toddobaad ee ka horeeya Habeenka Tirakoobka wuxuuna soo noqonayaa laba toddobaad ka dib Habeenka Tirakoobka si uu u qaado foomka oo buuxa. Tirakoobka 2006 dadka guryaha degani waxay awoodi doonaan inay helaan fursada ah ku buuxinta foomka Tirakoobka internetka.

## Caawimaad ma u baahan tahay?

Adeega Weydiimaha Tirakoobka oo ku talagelaya afafka guud ahaan laga isticmaalo Australia ayaa waxaa la heli doonaa dhammaadka Luulyo. Khadka Caawimaada Afka ee Adeega Weydiimaha Tirakoobka wuxuu ka shaqeynayaa laga bilaabo 8:30 subaxnimo ilaa 8:00 fidnimo lambarkan **1300 363 365**.

Tirakoob ururiyayaal leh xirfad luuqadeed ayaa laga shaqaaleynayaa goobaha ku haboon. Waxaa loo soo tababarey inay wax caawiyaan. Website ka Tirakoobka -- **[www.abs.gov.au/census](http://www.abs.gov.au/census)**- wuxuu sidoo kale lahaan doonaa waxyaabo turjuman.

**Xasuuso- Tirakoobku waa fursadaadii lagugu tirin lahaa.**